

# Wargeyska Mountain View

## Janaayo 25, 2017

Qamiis, Janaayo 26.....Habeenka Sayniska, 4:00-6:00 p.m. qolka shirarka  
Jimco, Febraayo 3.....Guddiga Bulshada Dugsiga, 3:15 @Maktabka Dugsiga  
Talaado, Febraayo 14.....Shirka Waalidiinta iyo Agaasimeyaasha, 8:15 @Qolka  
Shirka CLC 183  
Isniin, Febraayo 20.....Ma Jiro Dugsi, Maalinta Madax Weynaha  
Tuesday, February 28.....Parents and Principals Meeting, 8:15@CLC Room 183  
Talaado, Febraayo 28.....Shirarka Ardayga/Tababaraha/Waalidka

### Fariinta Agaasimaha

Waxaan ku faraxsanahay in aan kugu casumo Habeenka Sayniska. Waxaa lagu qaban doonaa qolka shirarka marka ay tahay 4:00 ilaa 6:00 p.m. Ardayda fasal kasta waxay wada sameeyeen mashruuca sayniska, waxaa la baray luqadda iyo fullinta habka sayniska. Waxaan jecelnahay in aad la timaadid caruurtaada si ay kuu tusaan waxa ay barten. Mashaariicda sayniska waxay xoogga saaraan weydiinta su'aal, iyaga oo fikrad ka soo jeediya su'aasha, kaddibna fulliya baaritaan ama tijaabo si loo fiiriyo haddii fikradaas tahay sax. Kaddib marka la fulliyo tijaabada, ardayda ku jirta fasalka waxay awood u yeelan doonaan in ay qoraan hawlaha ay fulliyeen, iyo waxa ay barten. Fadlan nagu soo biir waqtigaan wanaagsan.

### Waalidiinta iyo Macmacaanka

Agaasimeyaasha waxay jecel yahiin in ay kula kulmaan, kula qeybsadaan waxa ku cusub Mountain View, iyo in ay ka jawaabaan su'aalaha laga yaabo in aad qabtid. Wada hadalkena xiga ee loo qaban doono Waalidiinta iyo Agaasimeyaasha waxaa lagu qaban doonaa Community Learning Center (Xarunta Waxbarashada Bulshada) maalinta Talaadada, Febraayo 3, marka ay tahay 8:15. Waxaan rajeyneynaa in aan halkaas kugu aragno.

### Kaalmo Loo Baahan Yahay

Waxaan iminka raadinaa tababare cusub oo ah kaaliyaha aqoonyaanka jimicsiga P.E. si uu u hoggaamiyo fasaladena P.E. todobaadka oo idil. Arjiileyaasha waxay u baahan yahiin in ay diyaariyaan daruusta, iyo in ay maamulaan darsano arday. Booska waxaa laga shaqeyn doonaa 29,5 saac halkii todobaad, waxaana loo baahan yahay 48 saacadaha kulliyadda.